Portland Public Schools 2020 FALL Relmagining Education During the Pandemic

Dayrta 2020: Wararkii Cusbaa ee ugu dambeeyey Ogosto 7deeda

Ogosto 7, 2020

Qoysaska Qaaliga ee PPS,

Waxaan idiin haynaa dhowr arrimood oo cusub kuwaasi oo aan jecelnahay inaan idinla wadaagno, maadaama aan ku soo dhawaaneyno bilowgii sanad-dugsiyeedkii 2020-21. Sidii caadada ahay mar walab, waxaad kala socon kartaa wixii cusub ee macluumaad ugu dambeeyey iyo agab marka aad booqato shabakadani pps.net/fall2020.

Sida aad ka warqabtaan,iyada oo la raacayo tilmaamaha iyo tusaalooyinka madaxda caafimaadka iyo Guddoomiyaha Gobolka Kate Brown, casharadii waxbarashadu waxa ay noqon doonaan kuwa lagu qaato online laga bilaabo maalinta ugu horeysa ee iskuulku furmayo bisha Sebtamber 2deeda, ilaa laga gaadhayo ugu yaraan bisha Noofembar 5teeda. Waxa aanu sii wadi doonaan inaan idiin soo dirno wixii warar ah ee cusub todobaad walba. Marka aynu ku soo dhawaano bisha Sebtamber 2deeda, waxa aanu idinla wadaagi doonaa macluumaad muhiim ah iyo/ama xaasaasi ah kaasi oo ku saabsan sida ilmahaagu u bilaabi doono iskuulka iyada aan idiin soo marin doono dhowr kanaal oo ay ka mid yihiin qaab email ah iyo fariinta degdeg ah. Haddii aanad wali dooran in aad Waaxda Isgaarsiinta PPS ka hesho fariinta, waxaad sameyn kartaa inaad fariin u soo dirto adigoo qoraya ‘Haa (Yes) ama “Maya (No)” kuna so diraya lambarkani 68453. Fadlan waxaad ogaataan Waaxda Isgaarsiinta PPS waxa ay u isticmaashaa fariinta degdega waxyaabo kooban oo kaliya.

Waxa aan aad ugu faraxsanahay in aad qoysaskii iyo ardaydii aan dib u xiriirno. Labada todobaad ee ugu horeeya iskuulka waxaa loo qorsheeyey in ardayda laga caawiyo sidii ay ula qabsan lahaayeen ee ay ugu diyaar garoobi lahaayeen in sanadkaasi u noqon lahaa mid ay si wanaagsan ugu guuleystaan waxbarashadooda. Jadwalka waxbarashada iskuuulku waxaa ku jiri doono fursado lagu baranayo Barashada Shucuurta Bulshada qaab ah in la isku xiro iyo in la dhiso xiriirka ka dhexeeya, sidoo kale in la meeleeyo rajooyinka iyada oo loo adeegsanayo casharada waxbarashada iyo dhaqanka fasalka dhismaha iskuulka muuq baahiye ahaan.

Waqtigani wuxuu noo ogolaan doonaa sidoo kale in aan xaqiijino habka aan u isticmaaleyno online-ku uu si fiican u shaqeynayo oo baaxad weyn, dugsiyada degmada ahaan baaxadaasi ballaaran waa u diyaar ardayda iyo macallimiintu, iyaga oo midba midka kale ku xiran yahay kuwaasi oo aad ugu faraxsan qalabka ay waxbarashadooda ku qaadanayaan ee ay isticmaalayaan.

Waxa noo qorsheyn in aan dhowr fursadood oo aan ugu talogalnay sidii aan ku bari lahayn in aan u soo bandhigno muuq baahiye ahaan inaan xaqiijino in dhammaan ardayda iyo waalidiinta/daryeel-

bixiyaasha in ay aqoon u leeyihiin inay fahmaan qalabka online ee ardayda iyo macallimiintu ay isticmaali doona xilligan dayrta ah,intaas ka bacdi xarunta gargaarka laga soo dalbado waxa ay noqon doontaa online marka la gaaro todobaadka Ogosto 17keeda.

Tiro ka mid ah koox hawleedka degmada waxa ay sii wadi doonaa in ay ka shaqeeyaan Qorshaha Hawlgalka Dugsiyada Dadweynaha Portland ee 2020-21, kaasi oo la hordhigi doono habeenimad Tallaadada Guddiga Golaha Waxbarashada. Qorshahani waxbarashada iyo sida loo taageerayo sanad-dugsiyeedka soo socdaa waxa uu koobsan doonaan qeybaha ay ka mid yihiin xaalada waxbarashada ee guryaha lagu qaadanayo, caafimaadka iyo fayo-qabka, sinaanta jinsiga iyo sida loo helayo, waxbarashada gaarka ah, taageerada la siinayo ardayda iyo qoysaska, iyo sidii loo helayo cuntada ay ardaydu cunaan.

Kooxahayagani waxa ay sii wadi doonaan sidii ay u kala hufi lahaayeen sida uu u ekaan doonaan casharada ay qaadanayaan ardaydu xilliga dayrta, waxa aanu jecelnahay in aan idinla wadaagno kuwii ugu dambeeyey faahfaahintooda:

- Dhammaan ardayda PK-5 waxa isla hal mar maalin walba (si toos ah oo waqtigii jadwalka ee la qorsheeya ah) macalimiintu u hubin doonaan inay joogaan ama maqan yihiin. Ardayda Dugsiga Sarre iyagu waxa ay yeelan doonaan jadwal joogta ah hal mar inay joogaan iyo inay maqan yihiin marka ay casharada qaadanayaan. Waxa aanu ka shaqeyneynaa sidii aan u iskugu miisaami lahayn isku geynta guud ee waqtiga casharada ay ardaydu qaadanayaan iyada oo la raacayo habka ugu wanaagsan iyada oo laga eegayo waqtiga ay shaashada hor fadhiyaan da'aha kala gedisani. Maqnaanshaha iyo joogitaanka ardayda waa la qaadi doonaa, markaa fadlan waxaad hubisaan in ardaygaagu maalin walba ka soo xaadiro iskuulka.
- Ardaydu waxa ay fursad u heli doonaan in ay la xiriiri karaan saacadaha xafiisyada iskuulku furan yihiin macalinkooda, iyaga oo ka helaya in laga caawiyo waxbarasahada iyo baahiyaha caafimaadka maskaxda/fayo-qabka iyo inay helaan manhaj dheeraad ah oo ka baxsan ka qaataan
- Intooda badan addeegyada gaarka ah, oo ay ka mid yihin Waxbarashada Gaarka ah iyo ESL, waxa loo heli doonaa isla hal mar haddii ayna qoysasku iyagu go'aansan inay xilligaasi waxbarashada ay ka dhigaan waqti ka gedisan.

Waxa aaanu sidoo kale ballaarineynaa dhowr dariiqo oo aan ku caawineyno ardaydayada sanad-dugsiyeedka soo socda:

- Waxaa sidoo kale diyaar u ah ardayda dugsiyada sarre iyo dugsiyada hoose shaqaalaha bulshada. Waxa kale oo diyaar ah la-taliyaal dheeraad ah dugsi dhexe oo kasta. Waxa loo tababaray sidii ay uga caawin lahaayeen xanuunada jahawareerka iyo sinaanta jinsiga iyo waliba cadaalada bulshada.
- Waxa aanu ballaarineyn saaxiibadayada hay'adaha bulshada ee aan addeegsaneyno sidii ay ardayda uga daaweyn lahaayeen caafimaadka maskaxda dhinaca telefoonka iyo sidii loo shaqaaleysiin lahaa qalab dheeraad ah kuwaasi oo ay isticmaali doonaan xirfadlayaashu sidii ay u gargaari lahaayeen ardaydeena aan heli gargaarkii ay u baahnaayeen kuwaasi oo qaba dhib

dhinaca caafimaadka maskaxda iyo caqabadaha ay qabatimeen maandooriyaasha.
- Waxa aanu iskaashi la sameynay bulshooyinkeena leh dhaqanada iyaga u gaarka ah iyada oo aan dhammeystireyno dariiqooyin aan u abuuri karno gargaarka aan u fidineyno qoysaska iyo ardayda BIPOC (madowga, asalka ah, iyo dadka midabkoodu aanu ahayn cadaanka).

Qorshaha PPS waxa ay u gudbin doonaan Waaxda Waxbarashada Oregon todobaadka soo socda. Haddii aad jeceshahay in aad daawato bandhiga kulanka Golaha, fadlan guji halkan.

Habeenimadii Khamiistii waxaa kala qeybgalay Guddoomiyaha Waxbarashada Guerrero hoggaamiyaasha waxbarashada iskuulada degmooyinka ee Beaverton, Salem-Keizer iyo Evergreen shir qaatay saacad oo ka baxayey telefeeshinka KOIN-TV. Barnaamijkan waxaad ka dawaan kartaa, “Caruurta (Kids), Fasalka (Class) iyo Xanuunka Coronavirus,” idinka oo gujinaya halkan.

Ururka Ciyaaraha Iskuulada Oregon (OSAA) wuxuu ku dhawaaqay maalintii Arbacada in ciyaarihii iyo hawlihii kale dib loo dhigi doono ilaa laga gaarayo bisha Janaayo. Haddii aad hayso su’aalo khaas ah oo ku saabsan ciyaaraha, fadlan waxaad la xiriirtaa iskuulkaaga ama xafiisyada PIL ee telefoonkiisu yahay 503-916-3223.

Waxa aan idinla soo xiriiri doonaa todobaadka soo socda, iyada oo qoysaska sidoo kale iskuuladiinuna ila soo xiriiri doonaan. Sidaas darteed, waxaan idiin rajeyneynaa caafimaad iyo fayo-qab. Todobaad wanaagsan baan idiin rajeyneynaa.